



OGAYSIISKA XAQUUQAHA

Xeerka Difaacyada Qandaraaslaha Madaxa Banaan (Independent Contractor Protections Ordinance)

Qandaraasleyaasha Madaxa Banaan ayaa Xaq u leh:

- Inay helaan ogeysiiska qoran oo sheegaaya shuruudaha iyo xeerarka laga doonaayo shaqada iyo shuruudaha iyo xeerarka lacag bixinta kahor intaan shaqada la bilaabin.
- Inay helaan lacagta waqtiga loo cayimay sida ku cad shuruudaha iyo xeerarka ogeysiiska qoran ee shaqada kahor ama qandaraaska.
- Haddii aan la qeexin, markaan lacagta waa in lagu siiyaa 30 maalmood gudahood kadib dhamaystirka adeegyada ku cad qandaraaska.
- Inay helaan ogeysiis qoraal ah oo sheegaaya qaybaha gaarka ah ee xogta lacag bixinta markasta oo lacagta la baxsho.

Qofkee ku jira Sharciga?

Qandaraasleyaasha Madaxa Banaan ee Iskood u Shaqaynta ee:

- 1 aan lahayn shaqaalaha,
- 2 sameeya ku sameeya wax kamid ah shaqadooda Seattle una qabta shirkad shaqaalaysiin oo ganacsi,


IYO

- 3 heli doona ama filan kara si macquul ah inay helaan ugu yaraan \$600 wadarta guud oo lacagta mushaarka ah ayna bixinayso wakaalada shaqaalaysiinta inta U dhexaysa Janaayo 1 iyo Diseebar 31 sanadkaas.

Wax kale

- Shirkadaha wax shaqaaleysiinaya waa inay ogeysiiskan siiyaan qandaraaslayaasha madaxa banaan isaga oo ku qoran Af-Ingiriisi iyo luuqada hooyo ee shaqaalaha isagoo waraaq ah ama elektaroonig ah kaasoo la geli karo kahor inta aanan shaqada la bilaabin
- Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha (OLS) ayaa bixiya turjumaado, fasiraado, iyo caawimaado la siiyo dadka naafada ah.

**ISKAANKA MARI HALKAAN
SI AAD U AKHRIDO
XEERKA BUUXA IYO
SI AAD U HESHO XOG
DHEERAAD AH:**



Ogoow XAQUUQDAADA Shaqaalaha:

- **AARGOOSIGU WAA MAMNUUC:** Sharciyadaan waxay ka difaacayaan shaqaalaha aargoosi ku aadan inay raadsadeen ama ku dhaqmeen xaquuqdooda sharci.
- **XAQA GUDBINTA CABASHADA:** Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay cabasho u gudbiyaan Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha (OLS, Office of Labor Standards) ama dacwad sharci ah gudbiyaan haddii cidda ay u shaqeenayaan jabiyo sharciyadaan.

- **XAQUUQAHA SHAQADA:** Haddii aad isleedahay waxaad tahay shaqaale, halkii aan ka ahaan lahayn qandaraasle madax banaan, la xariir Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha (OLS).

Ka shaqaale ahaan, waxaad xaq u lahaan kartaa in lagu siiyo mushaarka qofka jiran, mushaarka ugu yar, mushaarka saacadaha dheeriga ah, iyo nasiinooyinka cuntada iyo nasashada ee mushaarka lagu bixiyo. Fadlan dib u eegis ku samee [Tilmaamaha Kala Saarista Shaqaalaha \(Workers Classification Guide\)](#) kahor inta aadan OLS kagala soo xiriirin su' aalaha dheeraadka ah.

Samaynta xaquuqdaada sida ku cad xeerka ICP ayaan saamayn doonin wax xaquuqo ah oo shaqaale heli karo shaqaale ahaan.

La xariir Office of Labor Standards

QANDARAASLEYAASHA MADAX BANAAN: U gudbi cabasho Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha (OLS) ama dacwad u gudbi maxkamada.
WAKAALADAHA SHAQAALAYSIIINTA: Hel caawimaada ku dhaqanka sharciga iyo/ama gal tababar.

206-256-5297



**Seattle Office of
Labor Standards**

seattle.gov/laborstandards